

# OGAANSHAHA HORE & WAXQABADKA MAQALKA DHEGAHA

Jadwal ah tallaabo-tallaabo oo loogu talagalay qoysaska iyo daryeeyaasha



## Qiimeynta Maqalka

Xirfadlaha Maqalka:

Taariikhda Aqoonsiga:

### HEERARKA MAQALKA ILMAHAAGA:

#### Dhegta Bidix



- caadi
- xoogaa
- liita
- dhexdhexaad
- daran
- aad u daran

#### Dhegta Midig



- caadi
- xoogaa
- liita
- dhexdhexaad
- daran
- aad u daran

Xirfadlaha maqalka ayaa:

- Kula eegi doona teknoolajiga la kala dooran karo iyo siyaabaha xiriirka iskuulka.
- Heerarka maqalka dhegaha ilmahaaga u sheeg dhakhtarka imahaaga iyo Minnesota Department of Health (Waaxda Caafimaadka Minnesota).
- Qoyskaaga ku xir tasiilaadyada.

### Tallaabada xigta...

Waa in aad ilmahaaga ballamo kale uga qabato xirfadlaha maqalka/dhakhtarka.

Taariikhda Ballanta:

Wakhtiga:

Goobta:

### Ixtiraamka Aqoonsiga shakhsiyeed

Waxaan ixtiraameynaa ereyada ay dadku sheegtaan si loogu aqoonsado. Dadku waxay isu aqoonsan karaan in ay yihiin dhagool, qof dhega culus, qof aan dhegaha wax ka maqlin, qof maqalkiisu dadka ka duwan yahay, iwm. Waxaa laga yaabaa in aad aragto ereyada "Dhagool iyo Qof Dhega Culus (DHH)," oo loo adeegsanayo si guud-ahaaneed. Waxaad isticmaali kartaa ereyga "maqal la'aanta" marka baaritaan ahaan wax lagu soo ogaado.

### Baaritaankii maqalka dhegaha ee ilmahaaga waa heer ka baxsan sida caadiga ah.

Daryeelka iyo waxqabadka hore, qoyskaagu waxay heli doonaan taageero inta ilmahaagu soo kobcayo ee uu baranayo luuqadda iyo hadalka. La xiriir barnaamijyadaas markaad ilmahaaga iyo qoyskaaga u saameyneyso go'aamada hore, si loo hubiyo caafimaadka wanaagsan iyo horumarka ilmahaaga.

### Waraaqdan waxa aad ka baraneyso waa...

- Tasiilaadyo iyo barnaamijyo ayaa lagu hayaa
- Xirfadleyaasha Caafimaadka iyo Macluumaadka ayaa kugu daraya daryeelka ilmahaaga, iyo
- Tallaabooyinka la qaadi doono sannadka dambe si loo habsado kobaca ilmahaaga

### Haddaba hawsha bilow.



## Tallaabada koowaad waa in aad la xiriirto barnaamijyada caawinayo ilmahaaga

Barnaamijyadu khasab ma aha. Barnaamijyada deegaanka iyo gobolka waxa ay ka wada shaqeeyaan in ay daboolaan baahiyada ilmaha.

### Xafiska Local Public Health (Caafimaadka Dadweynaha Deegaanka ama LPH)

Xafiisyada LPH waxay bixiyaan adeegyo ah la-socoshada dhallaanka iyo ilmaha si aad u fahamto iyo si laguugu hago habraaca. MDH waxay kugu xiri doontaa xafiska deegaanka ee aad ka heleyso adeegyada aad u baahan tahay. Marka ay LPH kula soo xiriiraan, waxay kaaga jawaabayaan su'aalahaaga oo waxay kugu sii xirayaan:

- Tasiilaadyo Dhaqaale
- Tasiilaadyo Ceymis
- Aqoonsiga Takhasusaadka Daryeelka Caafimaadka
- Ururwenaha Qoys-ilaal-Qoya
- Waxqabadka Waxbarashada Hore
- Macluumaadka Xaaladaha Caafimaadka
- Tasiilaadyo Bulsho

### Minnesota Department of Health (Waaxda Caafimaadka Minnesota ama MDH)

Early Hearing Detection and Intervention (Ogaanshaha Hore & Waxqabadka Maqalka Dhegaha) (EHDI), 1-800-728-5420, [health.mn.gov/improveehdi](http://health.mn.gov/improveehdi)

Barnaamijka EHDI ee MDH ayaa kuu soo diri doona macluumaad qoraal ah oo kuu qeexaya tasiilaadka aad heli karto.



Maamulka Kheyraadka iyo Adeegyada Caafimaadka ee (HRSA) oo ka tirsan Waaxda Caafimaadka iyo Adeegga Aadanaha ee Maraykanka (HHS) ayaa idinla wadaagaya macluumaad ah in la bixinayo abaal-marin lacageed oo dhan \$369,000 iyadoon wax dheef-koror ah aan lagu saarayn taasoo katimid ilo aan dawli aheyn. Xogta halkan ku qoran waxay qusaysaa cidda qortay kamana turjumayso aragtida rasmiga ah iyo ogolaanshaha hay'adaha HRSA iyo HHS ama tan Dawladda Maraykanka. Wixii faahfaahin dheeri ah, fadlan booqo [HRSA.gov](http://HRSA.gov).

### Minnesota Hands & Voices

1-651-265-2435 Farriin-duubid Keliya;  
Boostada Intarnetka: [MNHV@lssmn.org](mailto:MNHV@lssmn.org);  
[www.mnhandsandvoices.org](http://www.mnhandsandvoices.org)

Minnesota Hands & Voices (MNH&V) is waxaa ka shaqeeya waalid ay u joogaan ilma ah dhagoole ama kuwa dhega culus (DHH). Waalid Hoggaan ah oo By Your Side™ oo aad ka heleyso deegaanka ayaa la soo xiriiri doona qoyskaaga si aad uga heshaan macluumaad iyo taageero.

### Minnesota Department of Human Services (Waaxda Adeegyada Dadweynaha)

Adeegyada Dhagoolaha iyo Dadka Dhegaha Culus 651-964-1514 (Taleefan ah fiidiyow)  
1-800-657-3663 (Taleefanka dhagoolaha)  
[mn.gov/deaf-hard-of-hearing](http://mn.gov/deaf-hard-of-hearing)

The Minnesota Deaf and Hard of Hearing (Dhegoolaha iyo Dadka Dhegaha Culus ee Minnesota Services Division Qeybtooda Adeegyada ama DHHSD) ayaa masuul ka ah abuurista iyo bixinta barnaamijyo iyo adeegyo cusub oo kala duwan si loo caawiyo carruurta iyo dadka qaangaaray ee ah dhegoolaha iyo dadka dhegaha culus.

### Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed ee Carrurnimada Hore

1-866-693-GROW (4769)  
[www.helpmegrowmn.org](http://www.helpmegrowmn.org)

Kala xiriir maamulka degmada iskuulka Help Me Grow. Carruurta ah DHH waxay xaq u yeelan karaan inay helaan waxqabad hore oo bilaash ah oo waxbarashada gaarka ah ee hore waxaa lagu siinayaa iskuulka dadweynaha. Shaqaalaha degmada ayaa kula soo xiriiri doona oo kaala shaqeyn doona si qorshe loo sameeyo. Carruurta ka weyn 5 jirka waxaa lagu sii xiri doonaa iskuul ah dugsiga hoose.





Xirfadlaha maqalka ayaa natiijada baarista u sheegi doona dhakhtarka ilmahaaga.

**Dhakhtarka Guud**

**Kilinig/La Xiriir:**

Dhowrka toddobaad ee soo socda, dhakhtarka kala hadal maqal la'aanta ilmahaaga haysata. Dhakhtarka waxa uu kugu sii xirayaa takhasusaad carruurta yaryar kala shaqeyn doona goobaha daryeelka ee soo socda:

**Dhakhtarka ENT (Takhasuska Dhegaha, Sanka iyo Cunaha)**

Dhakhtarka takhasuska dhegaha ayaa xaqiijinaya caafimaadka la xiriira qalabka caawiya maqalka (haddii lagu sheego).

**Dhakhtarka:**

**Goobta:**

**Taleefanka:**

**Dhakhtarka indhaha (Takhasuska Indhaha)**

Dhakhaatiir takhasus ku haysta indhaha iyo aragga, oo muhiim u tahay ilmaha dhagoolka ah iyo kuwa dhagaha culus.

**Dhakhtarka:**

**Goobta:**

**Taleefanka:**

**Takhasuska Hidderaaca (Takhasuska Dhaxalka iyo Hiddeha)**

Takhasuslaha hidderaaca ayaa kuu sheegaya maqalka dhegaha ee ilmahaagu haddii ay sababtiisu tahay dhibaatooyin kale oo ah caafimaadka.

**Dhakhtarka:**

**Goobta:**

**Taleefanka:**

**Ku samee waxyaabahan ilaa BISHA 1AAD**

**Dhakhtarka Daaweyna Carruurta**  
Kala hadal qiimeynta maqalka ilmahaaga. Dhakhaatiirta/takhasusleyaasha waxay ku qoran yihiin bogga dambe.

**Taariikhda & Wakhtiga Ballanta:**

**Dhakhtarka ENT**  
U qabo ballan ah wiisiteyn ay ku jirto hubinta qalabka maqalka (haddii lagu sheego).

**Taariikhda & Wakhtiga Ballanta:**

**Xirfadlaha Maqalka**  
U keen ilmaha si loola socdo iyo si loogu juusteeyo qalabka maqalka (haddii lagu sheego). Weydii siyaabaha lagu helo qalabka maqalka ee la amaahdo, haddii aad rabto

**Taariikhda & Wakhtiga Ballanta:**

**Help Me Grow (HMG)**  
Adigoo adeegsanaya Help Me Grow, la xiriir degmada iskuulka si aad ugala hadasho tallaabooyinka xiga ee adeegyada waxqabadka hore iyo si loo aqoonsado waxaad qabsan kartaan iyo baahida ilmahaaga iyo qoyskaaga.

**Taleefanka:**

**Taageerada Qoyska**  
Ku xirnow qoysaska kale ee carruurta ah dhegoolaha iyo kuwa dhegaha culus (DHH) (sida Minnesota Hands & Voices) oo la xiriir la-taliye/qofka qaangaarka ah ee lala xiriir ee DHH.

**Ku samee waxyaabahan ilaa BISHA 2AAD**

**Dhakhtarka Daaweyna Carruurta**  
Eeg oo akhriso horumarka ilmaha markaad keeneyso ballanta wiisiteynta (ama ka hor).

**Taariikhda & Wakhtiga Ballanta:**

**Xirfadlaha Maqalka**  
La socio oo tijaabi qalabka maqalka ee ilmahaaga (haddii lagu sheego). Kala hadal qorshe haddii ay qalabka maqalka ee ilmaha lumaan ama shaqeyn waayaan.

**Taariikhda & Wakhtiga Ballanta:**

**Maamulka Degmada Iskuulka**  
Shaqaalaha iskuulka degmada ee waxbarashada gaarka ah ee hore, la sameeyso oo dibu-eegis ku samee Individualized Family Service Plan (Qorshaha Adeegga Qoyska ee Shakhsi Ahaaneed ee IFSP) ama Individualized Education Program (Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed ee IEP).

**Taariikhda Ballanta:**

**Faahfaahin ka eego Fursadaha Xiriirka**

[mnlowincidenceprojects.org/Projects/ehdi/ehdiCommunicationOpp.html](http://mnlowincidenceprojects.org/Projects/ehdi/ehdiCommunicationOpp.html)



**Ku samee waxyaabahan ilaa BISHA 6AAD**

**Dhakhtarka Daaweyna Carruurta**  
Eeg oo akhriso horumarka ilmaha markaad xadirineyso.

**Taariikhda & Wakhtiga Ballanta:**

**Dhakhtarka indhaha (Takhasuska Indhaha)**  
Waa in la soo qiimeeyo aragga ilmaha.

**Taariikhda & Wakhtiga Ballanta:**

**Xirfadlaha Maqalka**  
Ugu gee wiisiteyn iyo daryeel ah la-socosho. Qiimeynta waa wiisiteynta maqalka oo ku salaysan hab ah ciyaar markuu ilmuhu sii weynaado.

**Taariikhda & Wakhtiga Ballanta:**

**Wixii qoraal dheeraad ah:**

**Faahfaahinta Adeegyada La-talinta Qoyska Dhagoolka iyo Luuqadda Dhagoolaha Mareykanka**

[lssmn.org/services/families/deaf-hard-of-hearing/mentor-services](http://lssmn.org/services/families/deaf-hard-of-hearing/mentor-services)



**Ku samee waxyaabahan ilaa BISHA 12AAD**

**Dhakhtarka Daaweyna Carruurta**  
Eeg oo akhriso horumarka ilmaha markaad xadirineyso.

**Taariikhda & Wakhtiga Ballanta:**

**Takhasuslaha Hidderaaca**  
Waa in la soo qiimeeyo aragga ilmaha.

**Taariikhda & Wakhtiga Ballanta:**

**Xirfadlaha Maqalka**  
Ugu sii wad baarista maqalka sida lagu taliyey si loo qiimeeyo iyo tijaabinta qalabka maqalka (haddii ay khuseyso).

**IFSP Iskuulka ama Kooxda IEP**  
Eeg oo akhriso barnaamijyada iyo adeegyada sida ay u qeexayaan IFSP ama kooxda IEP.

**Macluumaad Soo Hel & Soo Gudbi**  
Sii wad in aad wax fahamto oo aad ka hadasho tixgelinta qalabka iyo in aad kala doorato teknoolajiga maqalka caawiya ee ilmahaaga.

**SI AAD FAAHFAAHIN U HESHO MARKAAD RABTO**

**Faahfaahinta Minnesota Hands & Voices Waalid ilaa Waalid iyo barnaamijyada Hoggaanka Dhagoolaha iyo Dadka Dhegaha Culus**

[lssmn.org/mnhandsandvoices](http://lssmn.org/mnhandsandvoices)

